# Gargaarka Guued ee Degdega ah (EGA)

**Emergency General Assistance (EGA)**

## Waa maxay Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA)?

Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) waa lacag deeq ah oo degmada qofku deggan yahay ay siiso dadka dakhligoodu hooseeyo oo ay haysato xaalad Degdeg ah. Waxay noqon karaan hal qof ama qoys dad waaweyn keliya ah. Mararka qaarkood qoysaska caruurta haysta way qaadan karaan Gargaarka Guud ee Degdegga ah, waxayse u badantahay in ayba helayaa Gargaarka Degdegga ah (EA).

Arrimaha Degdegga ah waxaa tusaale u noqon kara guriga oo lagaa saaro, koronto, biyo, gaaska oo lagaa jaro, hooygaagii oo bangigu xaraash ku naadiyay, ama aad la'dahay curaartii gurigii aad degi lahayd adoo ka baqaya in aad noqoto qof aan heysan hoy.



**Ogow:** Mararka qaarkood degmooyinka waxaa ka dhamaada lacagta sannadka iyada oo aan sannad xisaabeedkii dhamaan. Haddii taasi dhacdo xafiiska degmmadu dadka ma siin karo deeqda lacagta cadaanka ah ee Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) illaa ay helaan lacag ay ku bixiyaan banaamijka Gargaarka (EGA).

## Yaa heli kara Garagaarka Guud ee Degdegga ah (EGA)?

Inta badan degmooyinku waxay samaystaan xeerar u gaarka ah oo la xiriira bixinta Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA). Laakiinse waxaa jira sharciyo gobolku leeyahay oo xadidaya, ayna tahay in ay raacaan.

**1)** Waajib ma aha in aad ku jirto ama aad buuxisay shuruudihii Gargaarka Guud (GA) si aad u hesho Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA).

**2)** Waa in aad buuxin karta sharciyada la xiriira heerka dakhliga. Si aad ugu soo baxdo dadka heli kara Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) waa in dakhligaagu ka hooseeyaa 200% ee heerka faqriga. Waxaad fiirisa tilmaan buxiyaha https://aspe.hhs.gov/poverty-guidelines oo aad ka heli karto tilmaan ku anfacda. Si aad u ogaato Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) labalaab tirada hoos ku taxan. Dakhligaagu waa in uu ka hooseeyaa intaas.

**3)** Waa in aadan qaadan 12ki bilood ee la soo dhaafay wax Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA).

**4)** Waa in aadan ku jirin barnaamijka (MFIP). Haddii aad ku jirto Barnaamijka (MFIP) waa in aad codsataa barnaamij kale oo ka duwan oo la yiraahdo Gargaarka Degdega ah (EA).

5) Waa in aad la tacaalayso xaalad Degdeg ah oo qof ka mid ah qoyskaaga ku timi oo khatar gelinaysa caafimaadkiisa ama nabadgelyadiisa qofka.

6) Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) waa in uu dejiyaa xaalaada dhibta badan ee taagan. Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) kuuma soo celinayo wax ijaar ah haddii dakhligaagu uusan bixin Karin ijaarkaaga bilaha soo socda, waana aad waayeysaa guriga si kastaba ha noqotee. Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) waxba ma bixinayo haddii aysan jirin adiga ama cid kale oo kaa bixinaysa waxa aad qabto. Degmooyinku waxay tan u yaqaaniin beekhaaminta kharashka."

7) Waa in marka hore aad isticmaashaa lacagtaada. Gargaarka Guud ee Degdegga ah (EGA) waxay kaa bixinayaa waxa aadan adigu bixin Karin.

Degmooyinku waxaa laga yaabaa in ay leedahay sharciyo badan oo u gaar ah, oo ay ka mid noqon karaan in qofka gurigaaga kula deggan in uu yahay muwaadin Amerikaan ah, ama uu leeyahay degnaansho sharci ah , ama waxay eegi karaan sida aad lacagtaada u isticmaasho bil ama laba bilood ka hor inta aadan dalban Gargaar. Xaafiiska Xaafaddu wuxuu go'aan ka gaari karaa inta ay ku bixinayaan ijaar, koronto, biyo , gaas iyo currata ( deposit).

## Siddee u codsadaa gargaaarka guud ee degdeg ah (EGA)?

Kaga codso khadka 20 daqiiqo ama in muddo ka yar MNbenefits.mn.gov.

Codso adigoo tagaya xafiiska cayrta (county) ama qabaa'ilka (tribal).

## Sidee yeelaa haddii la iidiido Gargaar?

Waxaad weydiisan kartaa racfaan (dib u eegid). Waxaad u dhiibtaa u qaybsanaha xaalkaaga warqad qoraal ah oo aad ku leedahay waxaan rabaa racfaan (dib u eegid) Degdeg ah. Degdeg macneheedu waa ka dhaqsa badantahay sida caadiga ah oo sababtu tahay xaaladda Degdegga ah ee ku haysata darted. Warqadda taariikh u yeel, nuqul (koobina) kala har. Fiiri Xogta Urursan, *Racfaan U Qaadashada DHS*. Ka wac markiiba xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 877-696-6529. Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Meelaha kale ee laga heli karo kaalmo Degdeg ah: Wac 2-1-1 gobolka oo dhan, ama 800-543-7709**.**



Waxaad kaloo fariin qoraak ah aad u diri kartaa ay weheliso nawaaxiga boostada (zip code) 898-211 ama hadalka tooska https://www.211unitedway.org/about-211/somali/.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**